




West Seattle Link Extension



Faahfaahin ku saabsan mashruuca

The West Seattle Link Extension (WSLE) waxay ka dhigi doontaa mid fudud oo dhaqso badan in lagu kala goosho inta u dhexeysa West Seattle iyo qaybaha kale ee gobolka. Haddii aad gaadiidka rakaabka aad u qaadaneyso goobta shaqada, dugsiga aad ku aadeyso, ama aad ku sahmineysa magaalada, Link light rail wuxuu kugu xidhi doonaa meelaha muhiimka ah ee West Seattle, SODO, iyo wixii intaa ka baxsan. The West Seattle Link Extension waa qayb ka mid ah Sound Transit 3, oo ah qorshe lagu ballaadhinaayo gaadiid-raaca gobolka oo ay ansixiyeen codbixiyeyaashu.



Xog badan ogoow, isku duwaan geli wararka lagu helaayo iimaylka, oona ogaaw sida aad uga qaybqaadan karto:

soundtransit.org/wslink

Wakhtiga mashruuca





Rakaabka Link ayaa sugi doona imaatinka tareenka Boosteejada Mount Baker.

Faa'idooyinka mashruuca

- WSLE waxeey ugu adeegi doontaa wax ka badan 20,000 rakaab maalin kastaa — iyadoo siinaysa hab dhaskhso ah, joogto ah, oo lagu kalsoonaan karo si loogu safro loogana soo safro West Seattle.
- Balaadhinta waxay nus ka dhigi doontaa waqtigii loogu safri jiray inta u dhexeeya West Seattle iyo bartamaha magaalada (Boosteejada Westlake) marka lagu xidho nidaamka Link ee gobolka.
- Mashruucan wuxuu suurto gelin doonaa ka horumarinta guryaha kharash ahaanta la awoodi karo iyo horumarinno kale seedaha boosteejooyinka mustaqbalka.

Waa maxay talaabada xigta ee West Seattle Link?

Inta lagu jiro wajiga naqshadeynta, waxaanu diiradda saari doonaa:

- Dib-u-eegista go'aannadii hore ee naqshadeynta si loo helo fursado lagu yareeyo kharashka.
- Helitaanka ruqsada wax-dhisitaanka iyo qorshaynta dhismaha.
- Kala falgalida bulshooyinka naqshadda kama dambeysta ah, magac u bixinta boosteejada, iyo farshaxanka boosteejada.
- libasahada/Helida dhulka aan u baahanahay si aan ugu dhisno mashruuca iyo ganacsiyada taageeraya iyo dadka degganayaasha iyadoo loo maraayo habka dib-u-dejinta.
- Dhismaha shaqada hore, oo ay ku jiraan diyaarinta goobta iyo dib u meeleynta khadadka adeegyada aasaasiga, si loogu diyaar garoobo wajiga weyn ee wax dhisida.

Su'aalo miyaad qabtaa?

La xiriir Kooxda Wada Shaqeynta Bulshada: westseattlelink@soundtransit.org ama wac 206-903-7229.

Doorkaaga qaado

Inta uu socdo mashruuca WSLE, Sound Transit waxaa ka go'an inay maqasho dhammaan codadka—oo ay ku jiraan bulshooyinka aan had iyo jeerba lagu darin kuwa codkooda la maqlo. Dadku waxay uga qayb qaadan karaan si fool ahaan la imaanayo goobta iyo si onlayn ahaanba, waxaana u furnahay talooyin ama fursado si aad u sii balaadhan lagula xiirirayo bulshada. Fadlan nala soo xiriir haddii aad jeclaan lahayd warbixin gaaban siinta xaafadda ama ganacsiga.

Sidee ayaan halkaan ku soo gaarnay?

- **2017:** Sound Transit waxeey billowday habka qorshaynta.
- **Janaayo 2022:** Balaadhinada West Seattle iyo Ballard Link ayaa si wadajir ah loogu qiimeeyay Bayaan Qabyo-qoraal ah oo ku saabsan Saameynta Deegaanka (EIS).
- **Sebtembar 2024:** EIS-ka Kama-danbeysta ahaa ee WSLE ayaa la daabacay.
- **Abril 2025:** La-hawlgalaheena federaalka, Federal Transit Administration, ayaa soo saaray Diwaanka Go'aanka, taasoo dhamaystirtay wajiga dib-u-eegista bey'adda ee mashruuca.
- **Gu'ga 2025:** Wajiga Naqshadeynta ayaa bilaabanaya iyadoo diiradda la saarayo falanqaynta fursadaha lagu yareenayo kharashka si loogu taageero mashruuca West Seattle Link Extension inuu dhaqaale ahaan wanaagsanaadaa.



Interpreter 800-823-9230

Español 漢語 한국어 日本語
Tagalog русский язык Tiếng Việt